
The Royal Liverpool and Broadgreen University Hospitals NHS Trust



Better together

# Warbixinta bukaanleyda

## Burada Fibroadenoma

Agaasinka Adeegyada Naaska

PIF 1147 V4

**Waa maxay burada Fibroadenoma?**

Burada la yiraahdo fibroadenoma waa kuus laga helo naaska dhexdiisa kaasoo ka yimaadda koritaanka xad dhaaf ah ee xubin jirka ka mid ah. Waxaa ugu badnaan haweenka laga helaa sanadaha ugu horreeya qaangaarka ee nolosha laakiin waxaa weliba lagu heli karaa da' kaste.

Taasi ma aha kansar, iskumana beddeli doonto kansar. Waxaa mararka qaar loo yaqaannaa "jiirka naaska" maxaa yeelay marka la tuujiyo ama la riixo waxay u muuqataa in ay naaska ku dhex warwareegto.

**Sidee ayuu takhtarku u garanayaa in ay taasi tahay burada Fibroadenoma?**

Dhammaan kuusaska naaska ku jira waxaa loo tixgeliyaa si dhab ah waxaana adiga lagaa qaadi doonaa dhowr baaritaan si loo soo ogaado waxa ay taasi tahay.

Kiliniigga marka aad joogto, waxuu takhtarku baari doonaa naasaha, si uu kuuska u eego.

Waxaa weliba dhici karta in takhtarka isbitaalku uu codsado baaritaanno si loogu caawiyo sheegidda cudurka (waxaa laga yaabaa in lagaa qaado baaritaannadan qaarkood ama dhammaantood):

- Sawirka raajada naasaha (mammogram) - Raajo gaar ah oo loo isticmaalo hirarka dhawaaqa si sawir looga sameeyo naaska (caadi ahaan loogu talagalay haweenka 40 jir ka weyn).

- Skaanka muuq hoose - Skaan laga qaado naasaha (la mid ah midka lagu sawiro ilmaha koraya ee ilmogaleenka ku jira).

- Baaritaanka irbadda - Waxuu kani takhtarka u suurtogeliyaa in uu xubin ama unugyo ka soo qaado kuuska. Takhtar kale oo takhasus leh ayaa unugyadaas ama xubintaas jirka ka mid ah ka dib ku eega makaraskoob, waxuuna warbixin dib ugu soo diraa takhtarkaaga kiliniigga.

**Waa maxay daawaynta aan u baahan ahay?**

Waxay daawayntaadu ku xiran tahay sida uu kuuskaagu u weyn yahay.

Caadi ahaan ka dib marka baaritaannada dhammaantood lagu xaqiijiyo burada fibroadenoma, taasoo qiyaas ahaan yar (ka yar laba cm ama hal insh), daawayn kale looma baahna.

Burada fibroadenoma waa mid aanan waxyeello lahayn, ma aha kansar, oo sidaas darteed khasab ma aha in la saaro. Waxaad ka dib ka tagi kartaa kiliniigga oo uma baahnid daawayn kale.

Mararka qaar baaritaannadaas ka dib, waxaa laga yaabaa in takhtarkaagu uu ku taliyo in kuuska lagaa saaro. Burooyinka fibroadenoma ee qiyaas ahaan ka weyn laba cm waxaa caadi ahaan lagu saaraa qalliin, suuxin guud lagu sameeyo.

Waxaa loogu baahan doonaa in muddo gaaban isbitaalka lagu jiro, caadi ahaan adigoo ah qof maalinta soo jooga ama mararka qaar habeenka. Waxaa naaskaaga dushiisa kaga hari doona nabar. Takhtarkaaga ayaa taas kaala hadli doona (fadlan fiiri buugyaraha ku saabsan saarista kuusaska naaska ee aanan waxyeello lahayn).

**Maxaa laga yaabaa in uu kuuskaygu ku dambeeyo?**

Haddii kuuskaaga aanan lagaa saarin, waxaad u baahan doontaa in aad kolba mar iska eegto kuuskaaga.

**Waxay taasi sidaas u tahay maadaama:**

- Burooyinka fibroadenoma qaarkood ay waqti ka dib yaraan doonaan ama baabi'i doonaan.
- Qaarkood ay isla qiyaastaas ahaan doonaan oo aanay isbeddeli doonin waqti ka dib.

Labadaas midkoodba waa wax niyadda dejiya oo daawayn looguma baahna.

**Hase yeeshee**:

- Burooyinka fibroadenoma qaarkood ayaa laga yaabaa in ay koritaan bilaabaan.

**Maxaa dhacaya haddii kuuskaygu weynaado?**

Haddii waqti kastoo mustaqbalka ah uu kuuskaagu koritaan bilaabo, ama isbeddelo **fadlan takhtarkaaga qoyska (Takhtarka Guud (GP)) weydiiso in uu dib kuugu celiyo kiliniigga si kaas loo eegi karo. Waxaad u baahan kartaa in lagaa saaro.**

## Warbixin dheeraad ah

**Xirfadleyaasha Kalkaaliyaha caafimaadka ee Naaska (Breast Nurse Practitioners)**
**Tel: 0151 706 2931**
**Lambarka Telefoonka qoraalka: 18001 0151 706 2931**

**Kalkaaliyeyaasha caafimaadka Daryeelka Naaska (Breast Care Nurses)**
**Tel: 0151 706 2927**
**Lambarka Telefoonka qoraalka: 18001 0151 706 2927**

**Takhtarkaaga qoyska ama Kalkaaliyaha caafimaadka ee Xafiiska takhtarkaaga (Practice Nurse)**

**Daryeelka Kansarka Naaska (Breast Cancer Care)**
**Tel: 0808 800 6000**
**www.breastcancercare.org.uk**

**Qoraaga: Agaasinka Adeegyada Naaska (Breast Services Directorate)**
**Taariikhda dib u eegidda: Oktoobar 2018**

All Trust approved information is available on request in alternative formats, including other languages, easy read, large print, audio, Braille, moon and electronically.

يمكن توفير جميع المعلومات المتعلقة بالمرضى الموافق عليهم من قبل ائتمان المستشفى عند الطلب بصيغ أخرى، بما في ذلك لغات أخرى وبطرق تسهل قراءتها وبالحروف الطباعية الكبيرة وبالصوت وبطريقة برايل للمكفوفين وبطريقة مون والكترونياً.

所有經信托基金批准的患者資訊均可以其它格式提供，包括其它語言、 易讀閱讀軟件、大字

體、音頻、盲文、穆恩體（Moon）盲文和電子格式，敬請索取。

در صورت تمایل میتوانید کلیه اطلاعات تصویب شده توسط اتحادیّه در رابطه با بیماران را به اشکال مختلف در دسترس داشته باشید، از جمله به زبانهای دیگر، به زبان ساده، چاپ درشت، صوت، خط مخصوص کوران، مون و بصورت روی خطی  موجود است.

زانیاریی پێوەندیدار بەو نەخۆشانەی لەلایەن **تراستەوە** پەسەند کراون، ئەگەر داوا بکرێت لە فۆرماتەکانی تردا بریتی لە زمانەکانی تر، ئیزی رید (هاسان خوێندنەوە)، چاپی گەورە، شریتی دەنگ، هێڵی موون و ئەلێکترۆنیکی هەیە.

所有经信托基金批准的患者信息均可以其它格式提供，包括其它语言、 易读阅读软件、大字体、音频、盲文、穆恩体（Moon）盲文和电子格式，敬请索取。

Dhammaan warbixinta bukaanleyda ee Ururka ee la oggol yahay waxaa marka la codsado lagu heli karaa nuskhado kale, sida luqado kale, akhris fudud, far waaweyn, dhegeysi, farta braille ee dadka indhaha la’, Moon iyo nidaam eletaroonig ah.

A5/White